# Iska fiiri. Iska baar. Ka guuleyso!

Hore u ogaanshaha Kansarka Waxay **badbaadin kartaa nolosha**

## Kansarka Mindhicirka

Kansarka mindhicirka waa nooca saddexaad ee ugu caansan kansarka. Baaritaanku wuxuu kaa caawin karaa ka hortagga kansarka mindhicirka ama ku ogaanshaha waqti hore, marka ay fududahay in la daaweeyo.

### Baaritaanka

**Xirmada qalabka baaritaanka ee FIT**

Xirmada qalabka baaritaanka ee Fit waxaa loo diri doonaa cinwaankaaga guriga oo ku yaal diiwaanka dhakhtarkaaga guud. Xirmada baaritaanka waxaa lagu sameeyaa adigoo ku xoqaya usha muunada qaada saxaradaada (xaarka) ilaa dhammaadka usha la daboolo kadibna dib loogu celiyo dhalada muunada qaada. Ku qor taariikhda dhalada oo dib ugu soo dir boqshadda horay loo bixiyay, Xusuus-now INAAD SOO DIRTO ISLA MAALINTAAS

Iskaan mari QR-ka si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah

### Waa kuwee?

Da'da 50 ilaa 74

Qof kastaa waxaa laga baraa 2dii sanaba mar

Da'da 75 ama ka weyn — codso baaritaanka

Khadka caawinta baaritaanka kansarka mindhicirka 0800 707 6060

## Kansarka Ilmo-galeenka

Kansarka ilmo-galeenka wuxuu inta badan saameeyaa haweenka da'doodu ka yar tahay 45 sano. Guud ahaan waxaa sababa infekshanka leh noocyada khatarta sare ee (HPV)

### Baaritaanka

**Qaadista dhacaan yar**

Baaritaanka waxay ka kooban tahay isticmaalka buraash yar oo jilicsan si aad muunad unugyo ah uga qaado makaanka afkiisa.

Baaritaanka ma aha in laga fiirinayo kansarka laakiin in laga fiiriyo noocyada HPV

Iskaan mari QR-ka si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah

### Waa kuwee?

Da'da 25 ilaa 49 Saddexdii sanaba mar

Da'da 50 ilaa 64 Shantii sanaba mar

Qof kasta oo leh Ilmo-galeen waa inuu u tagaa baaritaanka ilmo-galeenka

Khadka caawinta baaritaanka kansarka ilmo-galeenka 0808 802 0019

## Kansarka naasaha

Qiyaastii 55,000 oo haween ah ayaa laga helaa kansarka naasaha sanad kasta ee dalka UK.

### Baaritaanka

**Raajada naasaha (X-ray)**

Waxaa lagu dhammaystiri doona 4 jeer 2 mar naas kasta waxana sameyn doona 1 ama 2 xubin dumar ah oo ka tirsan shaqaalaha.

Iskaan mari QR-ka si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah

### Waa kuwee?

Da'da 50 ilaa 71 Saddexdii sanaba mar

Da'da 71 iyo wixi ka weyn wey codsan karan iyaga

Baaritaanku wuxuu qaadan doonaa qiyaastii 30 daqiiqo.

Khadka caawinta baaritaanka kansarka naasaha 0808 800 6000

## Ha u siin fursad, iska fiiri , iska baar, ka guuleyso!

Wixii macluumaad dheeraad ah, qaado buug yaraha ama iskaan mari QR